# FARQIGA GUULEED EE U DHAXEEYA ARDAYDA - MINNESOTA STUDENTS ACHIEVEMENT GAP

***"Qaabaynta Wacyiga Ardayda/ Dhallinyarada"***

**|Madasha Wacyigelinta |Barnaamijka Tayo - Qaybta 1aad |Luulyo 26, 2021**




***Sh. Hassan Hade***

## ARAR

Fagaaraha **TAYO** (Taking Action for Youth Orientation) waa barnaamij wacyigelineed oo qayb ka ah barnaamijta Xarunta Bayaan ay kaga qayb qaadato kobcinta garaadka bulshada iyo kor u qaadidda wacyigooda. **TAYO** waxa ay ku wajahan tahay ardayda, waalidiinta, siyaasiyiinta, waxgaradka, dhallinyarada iyo dhammaan bulshada qaybaheeda kala duwan. Ujeedada Fagaaraha **TAYO** waa; kobcinta garaadka bulshada iyo kor u qaadidda tayada waxbarashada dugsiyada, masaajidda iyo dhammaan hay'adaha ay bulshadu leedahay. TAYO waxa ay noqon doontaa minbar ay ku kala warqaataan, ku aragti-wadaagaan, kuna kulmaan aqoonyahanka, barayaasha jaamacadaha, dadka xarumaha cilmibaarista ka hawlgala, macallimiinta, waalidiinta iyo dhammaan qaybaha bulshada.

Haddaba iyada oo laga duulayo muhiimadda iyo baahida loo qabo barnaamijka TAYO, ayaa **Xarunta Cilmibaarista Bayaan** oo ah xarun bulsheed, oo aan faa'iido doon ahayn, isla markaana abuuraysa deegaan aqooneed togan, kuna qotoma fikradaha/ aragtiyaha, waxay soo qaban qaabisay Fagaaraha **Tayo - Qaybta 1aad,** oo qayb ka ah Madasha Wacyigelinta ee BRC.

Doodda waxaa daadihina isla markaana qaybinayay hadalka **Sh. Xassan Hade** oo ka mid ah hoggaamiyayaasha - **BRC**-. Halka marti dooddu ay ahaayeen:-

1. **Dr. Mustafe Ibraahim**
2. **Cabdiraxmaan Cabdulle Xiddig**
3. **Cabdulqaadir Cabdalla**
4. **Maxamed Warsame**

**FARQIGA GUULEED EE U DHAXEEYA ARDAYDA -** Minnesota

**Dr. Mustafe Ibraahim,** ayaa ugu horrayn falanqeeyay sababta keentay in ay ku kala duwanaadaan tayada waxbarasho iyo waxsoosaarka aqooneed ardayda caddaanka ah iyo kuwa ajaanibta ah ee Minnesota ku sugan.

Dr-ka oo hadalkii ku bilaabay u mahadcelinta BRC iyo hawl-wadeennadeeda ayaa tilmaamay in loo baahan yahay dhowr qodob si loo qiimeeyo farqiga aqooneed ee u dhaxeeya ardayda caddaanka ah iyo kuwa madowga ah, soojeedintiisuna waxay ahayd sidan:

1. **Waa in la qiimeeyo imtixaannada ay galaan labada koox ee ardayda ah si loo cabbiro farqiga jira.**
2. **Waa in la ogaado ardayda qalin jebisay (Graduate students).**
3. **Sidoo kale waa in la ogaado inta ardayda caddaanka ah iyo kuwa kle diyaar u ah college-ka ama jaamacadda.**




Dr-ka oo sharraxaad kooban kasii sameeyay qodobadaas ayaa sidan yiri:

**“Tusaale ahaan; 2019kii** imtixaanka wasaaradda waxbarashadu qaaddo oo loo yaqaan **MCA** ga, fasalka 4aad 74% ayaa ardayda caddaanka ah meeshii loogu talagalay gaartay ama ka sarreeya, halka 34% ardayda madowga ah oo fasalka afraad ay meeshii la rabay gaareen. Fasalka 11aad marka la gaaro ardayda caddaanka ah 52% meeshii la rabay way joogaan wayna dhaafeen, markii loo fiiriyo ardayda madowga ahna 16% weeye. Dhanka kale ardayda 4ta sano ba dugsiga ka baxda dadka caddaanka ah waa 88% halka ardayda madowgu noqonayaan 67%. Dhanka u diyaar noqoshada College ka ama jaamacadda ardayda caddaanka ah 68% weeye halka kuwa madowga ahi ay yihiin 24%.”

**Cabdulqaadir Cabdalla**, ayaa isaguna gorfeeyay sababaha aasaasiga ah ee keeni kara in ardayda madowga ah ay ka hooseeyaan ardayda dhiggooda ah, iyaga oo isku macallimiin iyo isku manhaj ah, wuxuuna sheegay in ay la gudboon tahay bulshada soomaalida iyo guud ahaanba madow-maraykanka in ay dib isugu laabtaan, isla markaana aasaaska lagasoo dhisaa waxbarashada, dhaqaalahana la kordhiyo, macallimiintana dhaqaale ku filan la siiyo.




***Cabdulqaadir Cabdalla***

**Cabdiraxmaan Cabdulle Xiddig** ayaa isaguna tilmaamay in aysan marnaba jiri karin sinnaansho guud. Waayo waxaa la dhehaa ardayda madowga ah ama laga tirada badan yahay ee Minnesota ee dugsiyada dhigta waa 30% halka 5% lagu qiyaaso macallimiinta madowga ah, halkaas oo farqi wayn uu ka jiro. Waayo ardaygu waxa uu wax ka bartaa waa macallin uu fahmayo, oo af iyo dhaqan ay wadaagaan. Ardayguna waxa uu qaddariyaa macallinka isaga u eg oo uu af garanayo. Waxyaalaha keenaya farqigaas oo saldhigga u ahna waa state-kaan oo shaqrciyadiisa shaqaalaysiinta macallimiintu adag tahay.




***Cabdiraxmaan Cabdulle Xiddig***

**Maxamed Warsame** waxaa uu xoojiyay in arrinta laga hadlayo aysan ahayn oo keliya waxbarid balse ay salka ku hayso ilaalinta dhaqanka, haybta iyo afka bulshada. Dhanka kale, **Maxamed Warsame** oo ka hadlaya sababta keentay farqiga guuleed (**Achievement gap)-ka** u dhaxeeya ardayda ayaa ku nuuxnuux saday in imtixaanka loo yaqaan (**Standardized test**) uu yahay mid aan caddaali ahayn, isla markaasna aan loogu talagalin in uu ka guul gaaro qof luuqad kale ku hadla, dhanka kale waxa uu tilmaamay in uu ku qotomo imtixaankaasi dhaqanka, haybta iyo luuqadda dadka dhaladka caddaanka ah. Sidaa darteed waa caqabad kale oo hor taagan ardayda madowga ah iyo sabab kale oo gadaal ka riixaysa farqiga guuleed (**Achievement gap)** u dhaxeeya ardayda. Sidaas darteed ayaa waxa uu **Warsame** qabaa in ay lagama maarmaan tahay in la sameeyo manhaj ka turjumaya qiyamka, dhaqanka iyo haybta

ardayda madow-maraykanka ah ee laga tirada badan yahay, gaar ahaan kuwa Soomaalida ah si loo ilaaliyo haybta bulshada, dhaqankeeda iyo afkeeda.




***Maxamed Warsame***

**Dr. Mustafe Ibraahim** oo mar kale ka hadlayay muhiimadda iyo baaxadda ka faa'iidaysiga dugsiyada loo yaqaan **Charter schools** ayaa sheegay in laga faa'iidaystay oo ay jiraan arday Soomaaliyeed oo ka baxay kadibna ku guulaystay jaamacado caalami ah, se weli uu jiro firaaq u baahan in la buuxiyo oo si dhammaystiran looga faa'iidaysto. Dhanka kale Dr-ka ayaa aad ugu dheeraaday muhiimadda xiriirka ka dhaxeeya waalidka iyo dugsiga, iyo sida ay isugu xiran yihiin guusha ardayda iyo xiriirkaasi. Isaga oo sheegay in **Charter schools** ay kaalin weyn ka qaadanayaan horumarinta ardaydeena, ayna tahay in ay waalidku ku baraarugaan.

## TAYAYNTA ARDAYDA SOOMAALIDA AH

Dhanka kale waxaa dood dheer laga galay tayaynta ardayda Soomaalida ee ku dhaqan State-ka Minnesota. Iyada oo waalidiintu ay waxka weydiiyeen aqoonyahanka kulanka martida ku ah sida loo tayayn karo iyo caqabadaha hortaagan ardayda, ayaa waxa ka mid ahaa waxyaalihii lays weydiiyay; iyada oo ardayda Soomaalida ah ay ku dhasheen Minnesota luuqadda English kana ay ku garaadsadeen oo ay tahay afka keliya ee ay yaqaanaan, waa maxay sababta weli dhibaato luuqadeed looga sheegayo ardaydaas, sidee ayaase loo xoojin karaa luuqadda ardayda?!

**Cabdiraxmaan Cabdulle Xiddig** oo arrintaas falanqaynaya wuxuu kusoo ururiyay waxyaalaha sababaya arrintaas:-

- **Xilliga xagaaga:** Ardaydii markii uu sannad dugsiyeedkii u dhamaado, oo ay galaan xilliga xagaaga (Summer), ardayda Soomaalidu kama faa'iidaysato, halka kuwa dhiggooda ah la mashquuliyo.
- **Waalidka:** Waalidkii oo aan dabagal ku samaynayn ardayga xilliga uu fasaxa galo, taas oo caqabad ku ah wixii uu sannadkaas soo baranayay.

Dhanka kale, waxaa dhilid xooggan lagu sameeyay sidii kalsoonida ardayda Soomaaliyeed kor loogu qaadi lahaa, isla markaana loogu boorrin lahaa waxbarashada. Dooddaas waxaa ay xoogga saaraysay:

1. In la helo macallimiin Soomaaliyeed, maadaama ardaygu uu markasta qofka la luuqadda ah uu fahmi og yahay, isla markaana uu dareemayo kalsooni dhab ah.
2. In ardayda lagu dhiirrigeliyo jiilashii ka horreeyay, iyada oo loo casumayo ardaydii ka horreysay ee waxbarashada guusha ka gaartay, si ay tusaale fiican (Role model) ugu noqdaan, kalsoonidooduna ay u siyaaddo.
3. In waalidku ay guriga ku dhiirrigeliyaan ardayda, maadaama gurigu yahay dugsiga ugu horreeya ee ilmaha.

**GUNAANAD**

Doodda oo ay ka qayb-qaateen aqoonyahan baac dheer ku leh waxbarashada, dowrar kala duwanna ku dhex leh bulshada waxa ay kusoo idlaatay si qurux badan. Talooyin iyo bogaadin ay soo jeedinayeen aqoonyahankii kasoo qaybgalay kulanka kadib **Sh. Hassan Hade** oo ka mid ah tiirarka ugu muhiimsan –**BRC**- kulankana socodsiintiisa iyo isku xirkiisa lahaa ayaa u mahadceliyay dhammaan dhegeystayaashii iyo kasoo qayb galayaashii doodda oo ay ugu horreeyeen aqoonyahankii qiimaha badnaa ee martida ku ahaa kulanka.

Haddaba doodda oo faahfaahsan oo dhammaystiran lifaaqa hoose ka dhegayso:

https://www.youtube.com/watch?v=mJYGV64L6wg&t=1827s